



## Sida aan Idiinla Wadaageyno Wararka Ku Saabsan Marka Dugsiyada La Xidhayo Sababtoo ah Cimilada oo Xumaatay ama Iyada oo Baraf Badan Dhacay

Iyada oo munaasabadii Mahadnaqa (Thanksgiving) ay fooda inagu soo hayso todobaadka soo socda iyo waliba iyana xuska Christmas aanu sidaaba uga u fageyn, waxaan wajaheynaa waqtigii ugu qaboobaa sanadka, waxaana dhici karto inuu baraf badani yimaado. Haddaba waa waqti wanaagsan in la is xasuusiyo sida la idiin soo wargalinayo waqtiyada la xidhayo dugsiyada ee cimilada xumaatay taasi oo ay nolosha reer Portland joojiso. Waa kuwan dhowrka dariiqo ee macluumaadka aad ku heli kartaan:

- **Fariinta Dugsiga:** Waxaad heli kartaa fariin digniin qoraal ah ama wicitaanka is-dira oo soo wacaya telefoonkaaga gacanta kuuna sheegaya warar muhiim ah iyo wararkii ugu dambeeyey. Fariin "Haa" ama "Y" lambarka 68453 (Text "Yes" or "Y" to 68453).
- **Shabakada:** Shabakadayada, [www.pps.net](http://www.pps.net), waxaa si degdeg ah uga heli doontaan wararkii ugu dambeeyey. Waxaad fiirisaa bogga ugu horeeya ee shabakada korkiisa sare Khadka jaalaha ah halkaasi oo ay ku qoran tahay xaalada degdega ama xiritaanka dugsiyada oo ay keentay cimilada xumaatay.
- **Twitter:** Waxaan soo dhigi doonaa baraha bulshadu ku wada xiriirto wixii fariimo ee degdeg ah. Si aad u hesho wararkii ugu dambeeyey waxaad halkan kala socotaa koontadayada ([follow our account](#)).
- **Facebook:** Waxaan sidoo kale soo dhigeynaa facebook wixii macluumaad ah. Waxaad saartaa koontayada inaad jeceshay ("Like" [our account](#)) si aad u hesho wixii warar ee ugu dambeeyey waqtiyada ay dhaceen ama la filayo inay dhacaan.
- **Wicitaanka teleefanka:** Waxaa ku soo wici doono telefoonada is waca kaasi oo fariinta kugu soo gaarsiin doona telefoonkaaga ku diiwaangashan ardaygaaga iyada oo fariinta kugu soo gaarsiin doono luqadaha dhammaan dugsiyadu ay taageeraan. Xusuusnow inaan cusbooneysiiso macluumaadka dugsigaaga haddii aad bedeshay telefoonkaaga.

Go'aanada ku saabsan in la xiro dugsiyada taasi oo sababtay cimilada xumaatay iyo in dib loo dhigo waxaa la qaataa ka dib marka shaqaalaha gaadiidka Dugsiyada Dadweynaha Portland ay baaritaan ku soo sameeyaan jidadka laga bilaabo 2:30 subaxnimo, iyo waliba iyaga oo la tashi la sameeyaan kooxo khabiir ah oo ballaaran iyo hoggaamiyaasha dugsiyada degmada. Halkan ka akhri macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan nidaamka xiritaanka dugsiyada laga soo bilaabo bishii Maarso ee sanadkii 2019 ([PPS Pulse story from March 2019](#)).

Intii lagu gudo jiray sanad-dugsiyeedkii 2020-21, cimilada oo xumaataa ma ahayn arrin sidaa u weyn maadaama ay marka horeba dugsiyadeenu waa ay xirnaayeen oo uma furneyn in ay ardaydu waxbarashadooda xilligi bilaha jiilaalka ku qaataan fasalada sababtoo ah xanuunka faafayey ee COVID-19, iyo iyada oo fasalada waxbarashada ay ardaydu ay ku qaadanayeen guryaha qaabka CDL.

Sanadkani, waxaan soo celineynaa inaan maalmihii barafka isticmaalno si loo bogo waqtiyadii waxbarashada fasalada ardaydu ay qaadan lahaayeen ka luntay. Maalinta Madaxweynaha, Febraayo 21keeda, waxaa loo isticmaali karaa maalmaha lagu bogayo waqtiyada barafku dhaco (iyada oo la wargalinayo muddo ku siman 20 maalmood gudahood), iyo saddexda maalmood ee ugu dambeeya sanad-dugsiyeedka oo kala ah (Juun 13,14 iyo 15) kuwaasi oo loogu talagalay inay noqdaan maalmaha lagu bogo waqtiyadu barafku dhaco. Haddii loo baahdo, waxay noqon doonaan maalmo ay ardaydu fasalada waxabarashada ku qaataan. Sababtoo ay tahay caqabadaha lagala kulmayo dhinaca saadka iyo dareenada sinnaanta, ma isticmaali doono inay ardaydu waxbarashada ku qaataan qaabka CDL ee ay guryaha lagu qaadanayo marka uu barafku inagu qasbo in la xiro dhismayaasha dugsiyada,